IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIAH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad — Muqdisho, 20 Nof 1977 — L. IR 11

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOODNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 69 ee 8 Nof. 77, Dhismaha Wakaaladda Gaadiidka Badda. Bogga 1148

SHARCI L. 70 ee 12 Nof. 77, Wax ka beddel Sharciga Lam. yahay 3 ee 13 Luulyo 1976 oo ku saabsan nidaamka Maamulka Golaha Dhexe ee X.H.K.S. » 1154

SHARCI L. 71 ee 12 Nof. 77, Sharci lagu dhisay jago La-Taliyaha, Xagga Dhaqaalaha ee M. J. D. S. » 1155

### BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 20 Okt. 77, Dhismaha Xoghaynta Hawlaha Diyaarinta - Dastuurka Dalka L. 90 » 1156

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 20 Okt. 77, Magacaabid Xubnaha Xoghaynta Hawlaha Diyaarinta Dastuurka 91. » 1158

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 12 Nof. 77, Xeer lagu Magacaabay La-Taliyaha Madaxweynaha - Xagga Dhaqaalaha L. 92 » 1160

BOGGA KOOWAAD

# SHARCI

SHARCI L. 69 ee 12 Nof. 77, Dhismaha Wakaaladda Gaadiidka Badda.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.69

MARKUU ARKAY : Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1.7.76 1976 ee Habka Maamulka Guud ee Dawladda;

MARKUU ARKAY : Sharciga lamb. 7 ee 8 Jannaayo 1975 oo ku saabsanaa heshiis dhexmaray Dawladda Soomaaliya iyo Dawladda Liibiya ee Dhismaha Shariikadda Gaadiidka Badda;

MARKUU ARKAY : In Maamulka Shariikadda Gaadiidka Badda (National Shipping Line) ay socon weyday heshiiskii ku xusanaana sharciga L. 7 ee 8 Jannaayo 1975 noqday mid waxba aan ka jirin jiritaanka Shariikadda meesha ku baaba'day;

MARKUU AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan inla dhiso Wakaalad Dawladeed ee Madax Bannaan oo maamusho hawlaha ay qaban jirtay Shariikaddii hore ee Gaadiidka Badda (NSL) loona dejiyo nidaamka cusub oo lagu maamulo hawshaas;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aanka Golayaasha L. XGX-21-37-S-76 ee 13.5.1976 iyo kan Golaha Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirrada L. XGSGW-23-160-S-77 ee 22.9.1977.

WUXUU SOO SAARAYAA :

SHARCIGA SOO SOCDA :

## Qod. 1aad

## DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaaladda Gaadiidka Badda ayaa sharcigan lagu dhisay waxaana hadda ka dib lagu tilmaamayaa «Wakaalad»

2. Wakaaladda waxay ka mid noqon doontaa Wakaaladaha Dawladaha ee Madaxa Bannaan waxeyna yeelan doontaa jirid iyo astaan sharci ah.

3. Wakaaladdu waxey u hoggaansami doontaa Sharciyada iyo Xeerarka saameeya Wakaaladaha Madaxa Bannaan ee Dawladda, gaar ahaan:-

a) Xeerka Lr. 16 ee 1dii Abriile 1970 ee ku saabsan faaçidaada xisaabaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

b) Xeerka Lr. 58 ee 31kii Luulyo 1972 ee Lacagta Wakaaladaha Dawladda;

c) Xeerka Lr. 36 ee 22kii Abriile 1972 ee Shaqaalahaa Wakaaladaha Madaxa Bannaan iyo wixii beddelaad ah ee ka soo baxay shar-

Qod. 2aad

MEELEYNTA WAKAALADDA

Wakaaladda Gaadiidka Badda waxaa lagu meeleeyey darajada ah «A» xurunteedana waxey ahaan doontaa Magaalada Xamar, waxayna ku yeelan doontaa Gobollada iyo Degmooyinka Laamo ama Xafiisyo naddii loo baahdo.

Qod. 3aad

UJEEDDADA WAKAALADDA

Ujeeddada Wakaaladda Gaadiidka Badda waa sida soo soco-ta :

1. Iney ka haqab tirto Dalka Isgaarsiinta Badda, Xeebaha Dalka iyo Dibaddiisaba;

2. Iney baabi'iso kharajka lacagta adag ee dalka kaga baxda alaab keenidda iyo dhoofinta;

3. Iney isku xirto xeebaha dalkeenna iyo kuwa aan xiriir dhaqaale la lahaan karno ;

4. Iney abuurto xoogsato farsamayaqaan ah ee dalka ka haqabtiro baahidu u qabo farsama-yaqaan dhanka maraakiibta ;

5. Iney ka dhaliso dhaqaale xagga isgaarsiinta badda si loo horumariyo dhanka Gaadiidka Badda dakhliga uga soo galo ;

6. Iney qorsheyso sidii loo kordhinlahaa Gaadiidka Badda loona gaarsiin lahaa isku fillaansho;

7. Iney xaqiijiso diyaargarowga maraakiibta (efficiency);

8. Iney Maraakiibta Wakaaladda waday ku maamusho sida ugu habboon iyadoo la soconeyso fulinaysana awaamirta caalamiga ah ee saameeya Maraakiibta.

Qod. 4aad

AWOODDA WAKAALADDA

Wakaaladda awood buuxda bay u leedahay iney fuliso hawlaha loo xil saaray sida ku tilmaaman Qodobka 3aad ee sharcigan.

Qod. 5aad

KORMEERKA IYO AWOODDA WASIIRKA

1. Kormeerka guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha

2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siin karo awaamir iyo talooyin ku saabsan maamulka sidii sare loogu qaadi lahaa Wakaaladdana waxtar ku noqon lahayd;

3. Isagoo tixgelinaaya Qod. 1aad ee beddelaadda sharciga lamb. yahay 36 ee 22 Abriile 1972 Wasiirku wuxuu ku leeyahay Warshadda awood iyo mas'uuliyad buuxda xagga jaangooyada (Qorshaha) dhaqaalaha horumarinta iyo heshiisyada ganacsiga ee ay Wakaaladdu galayso.

Qod. 6aad

DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay yeelan doontaa Agaasin Guud oo ka Madax noqon doona. Maareeye Guud.

2. Wakaaladdu waxaa kale oo ay yeelan doontaa: waaxyo, xubno iyo laamo, waxayna awood u leedahay, hadday noqoto lagama maarmaan, inay laamo ka furto Gobollada iyo Degmooyinka si ay hawlaha loo xilsaaray u gudato.

QODOBKA 7aad

MAGACAABAAID MAAREEYAHA GUUD EE

WAKAALADDA

Wakaaladdu waxay yeelan doontaa Maareeye Guud oo lagu soo magacaabidoono Dekreetada Madaxweynaha JDS., isagoo tixgelinaaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha iyo taladaha Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada.

QODOBKA 8aad

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad la siman tan uu leeyahay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, sida ku qeexan Qodobka 3aad ee xeerka lamb. yahay 316 soona baxay 17.12.1975.

2. Maareeyaha Guud waajibkiisa wuxuu yahay :-

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysta Wasiirrada;

t) Inuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda.

j) Inuu mas'uul ka yahay Maamulka Lacagta Wakaaladda

isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda.

kh) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan.

d) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Wakaaladdu ee caadi ah;

r) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansha qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda.

QODOBKA 9aad

XILKA IYO MAGACAABIDDA MAAREEYAYAALKA WAKAALADDA

Wakaaladda Gaadiidka Badda waxay lahaan doontaa Maareeyayaal, kuwaasoo awooddooda iyo mas'uuliyadoodaba ay la mid tahay Agaasimayaasha Wasaaradaha.

Maareeya kasta waxaa lagu magacaabi doonaa Xeerka Madaxweynaha JDS., isagoo tixgelinaaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

Maareeya kasta wuxuu mas'uul ka yahay wanaagga iyo xumaanta Waaxdiisa ka timaada dhan dhaqaale dhan hawleed iyo dhan asluub iyo dhan shaqaba.

QODOBKA 10aad

XUQUUQDA IYO DHAQAALAHA SHAQAALAHA

Xuquuqda iyo dhaqaalaha Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha iyo shaqaalaha kala duwan, waxay noqoneysaa sida ku cad xeerka lamb. yahay 36 ee 24.4.72; kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda iyo sharciga Lamb. 17 ee soo baxay 21kii Abriile 1974, qaybta III, hantida, lacagta Wakaaladda.

Shaqaalaha ka shaqeyn jiray Shariikaddii hore ee walina ka shaqeeya Wakaaladda waxaa lagu wareejiyay Wakaaladda Gaadiidka Badda, waxaana loo aqoonsaday in shaqadoodii uu sii socoto (servizio continuativo) ayagoo la mid noqonaya shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan ee Dawladda xuquuq iyo dhaqaalahaba.

QODOBKA 11aad

QAABKA WAKAALADDA

Qaabka Shaqaalaha Wakaaladda Gaadiidka Badda waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha JDS; isagoo tix-gelinaaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dha[illegible]

## QODOBKA 12aad

## HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladda waxay ka kooban tahay:-

1. Maraakiibta iyo wixii hanti ma guurto ah ee Shariikaddii hore lagala wareegay;

2. Wixii lacag ah ee ka soo gala kirada maraakiibta;

3. Wixii lacag ah oo maalgelin ahaan ay Dawladdu ka siiso miisaaniyadooda.

## QODOBKA 13aad

## XISAABTA SANNADKA

Xisaabta sannadka wuxuu ka bilaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31 Diseembar ee sannad walba.

## QODOBKA 14aad

## MIISAANIYADDA IYO XIRIDEEDA

1. Maareeyaha Guud ayaa xil gaar ah ka saaran yahay in uu inta ka horreysa 30ka Oktoobar ee sannad kasta soo diyaariya miisaaniyadda sannadka soo socda, uu u gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaraddiisa;

2. Markey tahay 31 Maarso, Maareeyaha Guud waa inuu isku hagaajiyaa xisaabtii sannadkii hore, faa'iido ama khasaare una soo gudbiyaa Wasaaraddiisa iyo tan Maaliyadda.

3. Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaado bandhigga xisaabaadka isagoo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda.

4. Miisaaniyadda Wakaaladda laguma dari karo madax Iskaa-Wax-u-Qabso, mana laga bixin karo deeq nooc kasta ha ahaatee.

## QODOBKA 15aad

## MAAMULKA XISAABAHA

Wakaaladdu, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan iyadoo ilaalinaysa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo xeerarka Qaranka ku xusan.

QODOBKA 16aad

Xisaabaha Wakaaladda waxaa kormeeri doona Laanta goonida ah ee ka tirsan Xafiiska Hantidhowrka Guud loona sameeyey Kormeerka Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

QOD. 17aad

XEERKA GUUD

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awoo u leeyahay, isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradaha inuu Guddoomiyo Xeer Guud ee Wakaaladda xukuma, si looga hortago dhibaatooyinka ka imaan kara wixii aan ku sheegnay sharcigan.

QODOBKA 18aad

Sharciyada ka soo horjeeda sharcigan ama aan la sinneyn waa la baabi'yey, gaar ahaan waxaa la buriyay sharciga lamb. 7 ee 8 Jannaayo 1975.

QODOBKA 19aad

1. Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

2. Sharcigan wuxuu ka mid yahay sharciyada rasmiga ah ee JDS.

3. Qof kasta waa in uu dhowraa dhaqan geliyaa kuna qasbaa ruux kasta ee kale.

Muqdisho, 8 Noofembar 1977.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 70 wax ka beddel Sharciga lamb. yahay 3 ee 13 Luulyo 1976 oo ku saabsan Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DIM. SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin: 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976 ee ku saabsanaayeen dhisidda iyo la wareegidda xukunka dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe X.H.K.S. shirkiisa aan caadiga ahayn ee 27.10.77 oo wax kaga beddelay Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee X.H.-K.S. (Hoggaannada).

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1aad

Iyadoo la tixgelinaayo barnaamijka iyo Dastuurka X.H.K.S. iyo awooddii uu shirweynihii 1aad ee asaaska Xisbiga 1da Luulyo 1976dii siiyay Golaha Dhexe.

Iyadoo la daryeelayo dhaqso u socodsiinta iyo fulinta si waxtar leh hawlaha Xisbiga iyo Qaranka guud ahaanba waqtigan xasaasiga ah oo dalku ku sugan yahay waxaa la door biday in wax laga beddelo sharciga lamb. yahay 3 ee 13kii Luulyo 1976 oo lagu dhisay Hoggaannada X.H.K.S., loona beddelo sidan hoos ku qoran:-

I. Hoggaannadii Caafimaadka iyo Xannaanada Dadka, Caddaaladda, Tacliinta iyo Isboortiga, waxaa la isugu keenay Hoggaan keliya oo ah Hoggaanka Bulshada.

II. Hoggaannadii Cilmi Baarista ilo Culuunta Siyaasadda waxaa la isugu keenay Hoggaanka kaliya oo ah Hoggaanka Culuunta Siyaasadda iyo Cilmi Baarista;

III. Hoggaannadii Daafaca iyo Nabadgelyada waxaa la isugu keenay Hoggaan keliya oo ah Hoggaanka Daafaca iyo Nabadgelyada;

IV. Hoggaankii Ganacsiga iyo Maaliyadda, Beeraha iyo Sancada waxaa la isugu keenay Hoggaan keliya oo ah Hoggaanka Dhaqaalaha.

QODOBKA 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa ka billaabata 27.10.1977, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

QODOBKA 3aad

Waxaa la baabi'iyay Sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.-

SHARCI L. 71 Sharci lagu dhisay jago La-Taliyaha Xagga Dhaqaalaha ee Madaxweynaha J.D.S.

MADAXWEYNYAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad, iyo 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada kala ah 1, 17, 18 iyo 19 ee 1.7.1976

ISAGOO TIXGELINAAYO : Go'aankii Golaha Dhexe ee X.H.K.S. oo ku gaaray Shirkiisa aan caadiga ahayn ee 27.10.1977.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA :

QODOBKA 1aad

Waxaa la abuuray jago La-Taliyaha Xagga Dhaqaalaha ee Madaxweynaha J.D.S.

QODOBKA 2aad

Jagada lagu abuuray qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa Madax ka noqon doonaa Jaalle ka tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

QODOBKA 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa ka billaabata 27.10.1977, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 12 Nof. 77

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

## BOGGA LABAAD

## XEER

Xeer Madaxweynaha J.D.S. ee 20 Okt. 77, Dhismaha Xoghaynta Hawlaha Diyaarinta Dastuurka Dalka L. 90

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Qodobka 9aad ee Warqadda 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, kaasoo faraaya in la soo saaro Dastuurkii lagu maamuli lahaa Dalka;

MARKUU ARKAY: Barnaamijka Hoggaanka Sharciga iyo Caddaaladda ee Golaha Dhexe XHKS;

MARKUU ARKAY: Go'aankii Kalfadhigii 3aad ee Golaha Dhexe XHKS oo farayay in loo hawlgalo diyaarinta Dastuurka Dalka;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 1, 17, iyo 18 ee 1da Luulyo 1976;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in loo sameeyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Dastuurkii Dalka lagu dhaqi lahaa si loo joogteeyo Guulaha Kacaanka 21ka Oktoobar 1969; loogu fariisiyo sal adag habka Bulsho Dhaqaale iyo Siyaasadeed ee Dalka ka hirgalay loona dhammeystiro Sharciyada Aasaasiga ee J.D.S.;

MARKUU ARKAY: In dejinta Dastuurka u baahan tahay hawlo gogoldhig ah oo qoto dheer, xilkaasna uu habboon yahay in loo dhiibo Xoghayn kooban oo marka hore soo lafa gurta fikradaha iyo mabaadii'da Dastuuriga ah dabadeedna isku soo dubbarida talo Dastuur (Progetto di Costituzione) la mug ah aragtida iyo Himilada Jmhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

WUXUU SOO SAARAY

XEERKA SOO SOCDA:

### QODOBKA 1aad

Waxaa la dhisay Xoghayn ku magacaaban XOGHAYNTA HAWLAHA DIYAARINTA DASTUURKA DALKA;

Xoghaynta waxay ka kooban tahay lix iyo toban (16) qof, waxaana lagu magacaabaya Dekreeto Guur ah.

QODOBKA 2aad

Xilka Xoghaynta wuxuu yahay:

1. Uruurinta iyo baarista Dastuuryada Dalka ay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya la wadaagto caqiidad, degaan, iwm.

2. Qabanqaabin «simboosium» fikradaha iyo mabaadii'da Dastuur dejinta looga doodo;

3. Soo koobidda murtida baarista Xoghayntu sameysay iyo fikradaha simboosiyumada ka soo ban baxa;

4. Isku duwidda TALO DASTUUREED oo sababeysan iyo u dhigidda taladaas Guddiga Farsamada Dastuurka oo lagu magacaabi doono Xeer gaar ah;

5. Diyaarinta ajendaha fadhiyada Guddiga Farsamada Dastuurka iyo Qoridda Doodaha Guddiga;

6. Iskuduwidda talooyinka Guddiga Farsamda Dastuurka iyo dib-u-habaynta talo Dastuureedka;

7. U gudbinta TALO DASTUUREEDKA Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaailyeed.

QODOBKA 3aad

Xoghaynta waxay kaloo la soconeysaa heerarka kale ee diyaarinta Dastuurka, waxayna uruurineysaa, habeyneysaana talooyinka ka yimaadda Guddiyada Xisbiga ee Gobollada & Degmooyinka, Ururrada Bulshada & Dadweynaha.

Xilka Xoghayntu wuxuu dhammaanayaa marka Dastuurka rasmi ahaan u dhaqan galo.

QODOBKA 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 20 Okt, 1977

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)